


# Mac luumaadka ku saabsan Imtixaanka Minnesota ee Xirfadaha Tacliinta(MTAS)



## Waa maxay MTAS?

Imtixaanka Minnesota ee Xirfadaha Tacliinta (MTAS) waa beddel qiimeyn oo gobolka oo dhan ah oo loogu talagalay ardayda qaba naafada garaadka ee ugu badan MTAS waxay ku salaysan tahay heerarka la kordhiyay ee Heerarka Tacliinta Minnesota iyo tallaabooyinka akhriska, xisaabta, iyo xirfadaha sayniska ee waafaqsan manhajka guud ee waxbarashada. Imtixaanaadkani waxay matalaan filashooyin sare, iyaga oo ardayda u oggolaanaya inay soo bandhigaan waxbarashadooda.



## Yaa sameeya MTAS?

Dhammaan ardayda dhigata dugsiyada dadweynaha iyo charter-ka ee Minnesota ayaa looga baahanyahay in ay ka qayb qaataan qiimaynta gobolka oo dhan. Qiimaynta waxaa la siiyaa fasalo gaar ah oo akhriska ah (3-8 iyo 10), xisaabta (3-8 iyo 11), iyo sayniska (5, 8, iyo hal mar oo dugsiya sare ah). Kooxda Barnaamijka Waxbarashada Shakhsiyeed (IEP) waxay sameeyaan go'aano sannadle ah oo ku saabsan ka-qaybgalka ardayga ayagoo adeegsanayo dukumiintiga Shuruudaha U Qalmitaanka MTAS ee laga helaayo mareegta MDE.



## Siday ardaydu u sameeyaan MTAS?

MTAS waa qiimayn wax qabad oo uu maamulo macalinka ardayga (ama shaqaale kale oo ka mid ah shaqaalaha degmada iskuulka oo aqoon u leh ardayga) iyadoo ah hab hal ilaa hal ah. Shaqada waxaa laga yaabaa in kor loo akhriyo, oona la soo bandhigo iyadoo ay sawirro iyo/ama muuqaalo ay la socdaan si looga dhigo kuwa ay heli karaan ardayda u baahan taageeradaas oo kale. Ardaydu waxay uga jawaabi karaan siyaabo kala duwan (sida hadalka, far ku fiiqida, ama adeegsiga fiirinta indhaha) si ay u muujiyaan waxa ay ka yaqaanaan hawlaha.



## Maxay ardayda naafada ahi ugu qayb qaataan qiimaynta gobolka oo dhan?

Qiimaynta gobolka oo dhan, sida MTAS, waxay ardayda u oggolaaneysaa inay soo bandhigaan waxa ay garanayaan iyo sida ay ugu sameeyaan dugsiya. MTAS waxay bixisaa xog muhiim ah oo u oggolaanaysa dugsiyada inay hubiyaan in ardayda leh naafada garaadka ee ugu badan ay helaan baahidooda waxbarasho oo ay helaan waxbarid adag oo waafaqsan heerarka.



Kordhinta saxnaanta xogta



Go'aanka degmada iyo iskuullada ee la wargeliyay

## Ka Qaybqaadashada MTAS

Ka-qaybgalka ardayga ee MTAS waa muhim, sababtoo ah waxay fursad u siineysaa iskuulkaaga iyo degmadaada inay qiimeeyaan manhajkooda iyo wax baridooda si loo hubiyo in dhammaan ardayda ay helaan waxbarasho tayo sare leh. Inta badan ee ardaydu ay ka qeyb qaataan, waa inta badan ee xogta ay u saxantahay degmooyinka iyo dugsiyadaba si ay go'aanno xog-ogaal ah uga gaaraan sida loo isticmaalayo lacagta iyo khayraadka si loogu taageero dhamaan ardayda.